

BARO DHAQANKA FIICAN

ARDAYDA DUGSIYADA DHEXE

M. H. Hadi

28H

56-A-275

BARO DHAQANKA

No part of this work, "BARO DHAQANKA FIICAN" may be reproduced in any form or by means, electronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system, without written permission from the copyright owner.

FIICAN

Mohamed Hussein Hadi
Somali Resource & Heritage Center
1719 Bank St. Suite 302
Ottawa, Ontario, K1V 7Z4
TEL: (416) 733-1400
FAX: (416) 733-3956
E-MAIL: shrc@compuserve.ca

ARADAYDA DUGSIYADA DHEXE

Waxaa Qorey:

*Mohamed Hussein Hadi
Somali Resource & Heritage Center
Ottawa, Ontario. K1V 7Z4*



*Canada
Jan 1993*



GOGOLDHIG

Mahad naahay subxaanah wa tacaalaa ayaa iska leh, waxaana aan ugu mahadnaaya oggolaashaha uu il oggolaaday inaan qoro buuggan. Waxaana aan inaga baryayaa in guriga Islaamka, nasteexada maanka, naruurada samafalka iyo dhaqanka wanaagsani uu qalbiga ku beero. Guud ahaan, gaar ahaanna ubadka Islaamka ee ku sugan Qaarada Waqooyiga Amerika (Aaniga).

Copyright © 1995

ALL RIGHTS RESERVED

First print 1993 Ottawa, Canada

ISBN 0-9699945-0-8

No part of this book "BARO DHAQANKA FIICAN" may be reproduced in any form or by means, electronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system, without written permission from the copyright owner.

All questions and comments should be directed to:

Mohamed Hussein Hadi
Somali Resource & Heritage center
1719 Bank St. Suite 301
Ottawa, Ontario. K1V 7Z4
TEL: (613) 733-1463
FAX: (613) 733-3956
E-MAIL: alamagan@magma.ca

Maxamed Xuseen Hadi

GOGOLDHIG

Mahad Ilaahay subxaanahu wa tacaalaa ayaa iska leh, waxaana aan ugu mahadinaya oggolaashaha uu ii oggolaaday inaan qoro buuggan. Waxaana aan inooga baryayaa in nuurka islaamka, nasteexada maanka, naruurada samafalka iyo dhaqanka wanaagsani uu qalbigeena ku beero guud ahaan, gaar ahaanna ubadka islaamka ee ku sugan Qaaradani Waqooyiga Ameerika (Aamiin).

Dhaqanka bulshadu ma dhammaado oo waligiis wuxuu sii kobciyaa garaadka dadka, gaar ahaan faca soo koraya oo maskaxdoodu u furan tahay wax kasta oo lagu shubo. Buuggan oo aan ugu magac daray "BARO DHAQANKA FIICAN", waa buug dhinacayo badan oo dhaqanka, asluubta iyo edebta hadalka ka waramaya.

Waxaan Ilaahay (SWT) inooga baryayaa in uu inaga dhigo kuwii ku camal fala, kana faaideysta casharada ku qoran buuggan. Waxaan mahad ballaaran u celinayaa dhammaan intii igu dhiirigelisay, kuwii dib u habaynta igala qayb qaatay guud ahaan, gaar ahaanna khayr qabayaasha kala ah:


- * Muraad Cabdalla Mubaarak oo sawirada iyo qurxinta buuggan qayb libaax ka qaatay.
- * Asli Yuusuf oo kombyuutarka ku garaacday, kuna farsamaysay.

Maxamed Xuseen Hadi

TUSMO

Casharka	1aad	Tiirarka Islaamka.....	1
Casharka	2aad	Weyso.....	2
Casharka	3aad	Shanta Salaadood.....	6
Casharka	4aad	Wadajir iyo Iskaashi.....	7
Casharka	5aad	Saaxiibka Wanaagsan.....	9
Casharka	6aad	Deriska.....	11
Casharka	7aad	Dhalashada Nebigeena.....	13
Casharka	8aad	Nabi Maxamed (c.s.w.).....	16
Casharka	9aad	Siiradii Rasuulka.....	18
Casharka	10aad	Bedar.....	21
Casharka	11aad	Furashadii Makka.....	23
Casharka	12aad	Dhaqanka fiican.....	25
Casharka	13aad	Rasuulka (SCW) Dabeecadiisii....	27

CASHARKA 1 AAD
TIIRARKA ISLAAMKA



Sidee lagu ogaadaa qofku inuu Islaam yahay? qofkii islaam ahi waa inuu shanta tiir ee diinta islaamku ku dhisan tahay rumeeyo yaqaanana.

1. Ilaahay iyo Rasuulkiisii Maxamad in la rumeeyo.
2. Shanta salaadood, waqtigooda, in la tukado.
3. Sakada, waqtigeeda, in la dhiibo.
4. Bisha Soonqaad in la soomo.
5. Xajkana in la guto bisha carafa, qofkii awoodi kara.

LAYLI:

1. tiirarka Islaamka waa imisa, maxayna kala yihiin
2. Goormaa Xajka la gudan karaa?




CASHARKA 2 AAD






WEYSO

Qofku ma tukan karaa, haddii uusan weyso qabin?. Weysada horteedna qofka waxa laga doonayaa in jirkiisa iyo dharkiisaba ay daahir yihiin.

Weysada wanaagsani waa inuu qofku u sameeyo sida hoos ku qoran:

1. Waa in uu niyeystaa.
2. Waa in u faraha dhaqo 3 goor isagoo aan wasakh kaga tagayn.
3. Waa in uu luqluqdo.
4. Waa in uu sanko biyaha dhexgaliyaa, kana soo celiyaa.
5. Waa in uu wajiga dhaqdaa 3 goor fooda ilaa cunaha, dhagta midig ilaa dhagta bidix.
6. Waa in gacanta midig iyo midda bidix, teer iyo xusullada, uu dhaqaa 3 goor.
7. Waa in biyo la mariyaa madaxa 3 goor, laga bilaabo fooda ilaa qadaadka.
8. Waa in faraha oo qoyan la mariyaa dhagaha 3 goor ilaa gudaha suulkuna maro dhagta dhabarkeeda.






9. Waa in si fiican loo dhaqaa labada cagood, teer iyo kuraanta ama canqowga oo midigta la hormariyo, 3 goor.
10. Waa in xubnaha mayristooda sidaas la isugu xijiya adigoo raacaya habka ay u kala horeeyaan.

LAYLI:

1. Shuruuda weysada waa maxay?
2. Qofku ma tukan karaa haddii uusan weyso qabin?
3. Weysada horteed qofka maxaa laga doonayaa?
4. Ubadka yar yar ma laga doonayaa weysada?
5. Haddii aad Su'aasha (4)aad Maya aad tiraahdo sheeg sababta.

CASHARKA 3AAD

SHANTA SALADOOD



Shanta salaadood waa:

- 1) Subaxa oo laba rakcadoo ah
- 2) Duhur oo afar rakcadoo ah
- 3) Casar oo afar rakcadoo ah
- 4) Makhrrib oo saddex rakcadoo ah
- 5) Cishe oo afar rakcadoo ah

Salaadda ka hor qofku waa in uu niyeeysto, weyso qaato, jirkiisa, dharkiisa, iyo meesha uu ku tukanayana uu hubiyaa inay daahir tahay.

LAYLI:

1. Imisa salaadood baa nagu waajibtay, maxayse kala yihiin?
2. Qofka salaadda ma iska tukan karaa, mase wax kale baa ka horreeya?

وَأَنْصِرُوا لِلَّهِ لِيُنْصِرَ لَكُمْ وَأُخْرَىٰ

سورة آل عمران ١٠٣

Wadajirku wuxuu inoo keennaa xoog iyo liibaan. Markii dadku wadajir wax u qaybsado, ayuu kartidii nolosha uu kaga hor tegi lahaa yeeshaa. Noloshu waa ay qallafsan tahay haddii qof qof looga hor tago. Bal eeg cayayaanka iyo ugaarta ama dugaagga qaarkood, iyagu nolosha waxay kaga hor tagaan wadajir iyo iskaashi. Quraanjada iyo Shinnidu wadajir iyo koox koox ayey wax u qabsadaan. Ayda & Yeyduna wadajir bay wax u ugaarataa, duurjoogtuna koox bay u wada socotaa.

Gabayaaga Somaliyeed ee Cabdullahi Muse, isaga oo ka hadlayey wadajir iyo iskaashi wuxuu gabay ku yiri:

"Taageeraday laba gacmood tabar ku yeeshaane

Tiska waxa la qaadaa markay tiirisaa bidixe

Hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma gooyseene

Tuulaha magaaliyo halkaa teeyo lagu raaco

Haddii aan midun tegi lahaa tii kalaa maqane"

ERAY BIXIN:

Tis (ka): Ood la gooyey oo is-haysata

Tahar : (hibib....) aan si fudud ilkaha loogu goyn karin

ama aan loo calalin karin, badanaa weydnimo darteed.

LAYLI:

1. Wadajir maxaa laga faa'iidaa?
2. Dadka maahee, ayaa wadajir wax u qabsada?
3. Gabaygii cabdullaahi muse wax ka sheeg?
4. Fasir ereyada kala ah Tis iyo tahar ?

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الأعراف ٩٩

خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ عَنِ الْجَاهِلِينَ

وَالْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بَعْضُهُمْ
أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ يَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ

التوبة ٧١

Saaxiib waa qofkaad is-af garataan oo ay fikraddinnu israacdo.

Saaxiibnimadu waxay ka timaadaa isbarasho, lays dhaqan iyo sheeko barto.

Saaxiibnimadu waxay keentaa xiriir gaar ah iyo isu dhowaan kalgacal leh. Saaxiibka wanaagsani waa kii markaad bukooto ku soo booqda haddii dhib weyn ku gaartana had iyo jeer ku garab taagan.

Saaxiibnimada wanaagsan waa midda labada qof tusta xiriirka wanaagsan ee kalgacalka iyo is jeclaanta leh. Saaxiibnimo ma aha sida dadka qaarkiis u yaqaanno ee ah in wax xun lays faro, ballanfur iyo khiyaamo lagu dhaqmo. Saaxiibnimada wanaageedu waa:

In lays kaalmeeyaa wixii fiican laysu sheegaa, wixii xunna layska reebaa,

Ilaah cabsidiis lays faraa, dadkana la xaq dhawraa.

Waxaa jira dad iyo duunyo saaxiib ah, oo wax istarkoodu uusan ka liidan saaxiibnimada dadka u dhaxaysa; sida Ayda, Daayeerrada, Hombarada, Fardaha iyo kuwo kale oo badan.


Mararka qaarkood waxaa la arkaa in buug aad ka yeelatid saaxiib, maxaa yeelay, isagu sheeko ama cilmi aadan horay u aqoon buu ku siiyaa. Taasina kaaga roon saaxiib xun oo waqtiga bilaash, ama waxaan macna lahayn kaaga lumiya. Waxaad ogaataa in saaxibka muslimka ah ee diintiisa iyo sharaftiisaba dhowranaya ayaa kaaga wanaagsan, mid ah muslim ku sheeg ama aan diin iyo dhaqanba lahayn.

LAYLI:

1. Sheeg saaxiibka fiican iyo kan xun waxay ku kala duwan yihiin?
2. Ma suurowdaa dad iyo duunyo inay saaxiibaan?
3. Saaxiibnimo maxay tahay?
4. Ayaa ugu fiican in lala saaxiibo ?
5. Qof talo ku waydiiyey, maxaad kula talin lahayd in uu saaxib ka dhigto?

CASHARKA LIXAAD

DERISKA



Derisnimadu waa wax adduunka oo dhan laga yaqaan. Diinta Islaamkana aad iyo aad bay u ammantay oo waa kala caddeysay dadka deriska ah xuquuqda ay isku leeyihiin. Dadka xaqa fahmay wuxuu isu kaashadaa derisnimo oo waa laga ilbaxay qaabkii la isu raaci jirey waagii hore.

Labadii qof oo deris ahi, waa isaga dhow yihiin dadka kale, maxaa yeelay, iyagaa iska warqaba oo isu baahan goor walba. Dadkii ama qoysaskii deris ah waa inay is xaq dhawraan, wixi xumaan keeni karana iska ilaaliyaan.

Derisnimadu waxay ku fiican tahay in qofkii buka kan kale soo booqdaa, hawlaha dhibaataada badanna waa inay isu kaalmaystaan, dhibaataada caruurta ay keenaysana laga reebaa, nabadgelyana lagu wada noolaado. Deriskii sidaas ku kaca horumar ayuu gaaraa.

Xuquuqda derisku isku leeyahay waxaa ka mid ah:

alaabta oo la iska qaato,

haddii qof jirrado oo lays booqdo,

waqtiga hurdada ama nasashada oo lays xaq dhowro,

hawsha culus oo la isla qabto.

Dhibaatooyinka oo la iska gargaaro.

Somalidu maahmahyo badan bay ka yiraahdeen derisnimada.

Waxaana ka mid ah:

Ehelnimo, dhaqan wadaaggaa kaaga roon.

LAYLI:

1. Ka sheekee deriska wanaagsan?

Oraah ku dar erayadaan:

Xaq, booqasho adeeg, is kaalmeysasho.

2. Keen maah maah deriska ku saabsan?

CASHARKA TODOBAAD

DHALASHADA NEBIGEENNA

Dadka Carabta ah, Islaamka hortii waxay ahaayeen dad go'doon ah oo mugdi ama gurcud ku dhex nool. Iyagu badidoodu waxay ahaayeen xoolo dhaqato oo had iyo goor waxay isu leyn jireen qabiilnimo. Caadooyin xunxun oo kalana way lahaayeen. Caadooyinkaas waxa ka mid ahaa, ninkii gabari u dhalato, iyada oo nool innu xabaalo. Haweenka iyo carruurta yaryarna dhaxalka aabbahood lama siin jirin ee hadba ninkii u xoog roon baa xoolaha iyo talada reerkaba yeelan jirey. Taariikhda Masiixigu markay ahayd 571 baa Nebi Maxamad (NNKH) Maka ku dhashay, si dadka Carabta ah Eebbe uga saaro dulligii ay ku noolaayeen.

Nebiga dhalashadiisa ka hor, ayaa aabbihiis Cabdullahi dhintay, hooyadii Amina, waxay dhimatay isaga oo lix jir ah. Afartan sannadood markii uu gaarey Nebigu, ayaa Eebbe faray inuu dadka oo dhan gaarsiiyo diinta Islamka. Muddo dhan 13 sannadood markuu magaalada Makka dadkeeda diinta ugu yeeray, ayaa Eebbe faray inuu ka haajira (qaxo) Makka oo uu aado magaalada Madiina, meeshaas oo ay ka abuuranyay dawladii Islaamka ugu horreysey.

Ayaantii uu ka tegey Nebigu (NNKH) Makka, ayaa taariikhda Muslimku ka bilaabatay. Taariikhdaasna waxaa lagu magacaabaa <<HIJRIYA>>. Muslimiintii Makka ka soo qaxday ee maalkoodii iyo guryahoodii ka soo tegey, waxaa lagu magacaabay Muhaajiriin. Nebigu markii uu yimid Madiina, dadkii diinta Islaamka galayna waxaa la yiraahdaa Ansaar, magaca Ansaar waxaa loo bixiyey labadii qabiilo ee horey loo odhan jiray AWS iyo KHASRAJ oo si weyn ugu gargaaray Nabiga (NNKH). Dhamaantood waxaa la isku yiraahdaa Asaxaab.

Reer Madiina wanaagoodi wuxuu gaaray, qaarkood inay xoolahoodii la qeybsadeen walaalahood reer Makka, meeshaas isjeclaan iyo isku kalsoonaan walaatanimu dhab ah baa ka dhalatay muslimiinta dhexdooda.

LAYLI:

1. Carabtu, Isaamka hortii, siday u noolaayeen?
2. Sheeg intey ahayd taariikhdi Nebigennu ku dhashay Makka?
Maxaase lagu magacaabay taariikhda Muslimka?
3. Maxaa lagu magacaabay dadkii Muslimka ahaa ee Makka ka soo qaxay iyo kuwii Madiina ee Nebiga u gargaaray?
4. Dhammaantoodna maxaa la isku oran jirey?



CASHARKA SIDEEDAAD

NABI MAXAMAD (C. S. W.)

Nabi Maxamad, nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waxaa uu ahaa nin ilaahay doortay . Wuxuuna u doortay inuu diinta islaamka dadka gaarsiiyo, caddaan iyo madowba. Nabi Maxamed waxaa uu lahaa tilmaamo badan oo wanaagsan: hadal fiican, naxariis badan, dulqaad weyn iyo tilmaamo kale oo fara badan oo lagaga dayan karo.

Dadku hadalkiisa kama ay xiisa go'i jirin. Had iyo jeerna dadka wax wanaagsan buu u sheegi jiray. Waligiis kama aanu hadal wax aan dani ugu jirin isaga iyo ummaddiisaba. Wuxuuna oran jiray. "Qofku ama waa inuu wax khayr leh ku hadlaa ama waa in uu iska aammusaa."

Nabigu aad buu u naxariis badnaa. Dadka qofkii dhibaataysan wuu u kaalmayn jiray. Hadduu arko nin qof kale ku gardarroonaya wuu qaban jiray. Hadduu arko qof gaajaysan, waxa uu haysto ayuu wax ka siin jiray.

Nabi Maxamed (NNKH), aad buu u dulqaad badnaa, qofkii xumaan ku sameeya isla markiiba kama uu aargoosan jirin ee wuu u dulqaadan jirey. Si deggan oo fudud buu qofka gefkiisa ugu sheegi jirey. Marka uu qofku dembigiisa qirtana wuu saamixi jirey.


LAYLI:

Weydiimo;

1. Nabi Maxamed (c.s.w.) dadkee buu ka dhashay?
2. Nabiga Ilaahay muxuu u doortay?
3. Sheeg saddex wax oo uu Nabigeenu ku tilmaamnaa?

CASHARKA SIDEEAAD

SIIRADII RASUULKA



Siiradii Rasuulka waxaynu ku soo maqalney in Ilaahay u banneeyey Muslimiinta inay iska difaacaan Gaalada, waxaana shuruudo u ahaa:

1. In Qurayshta lala dagaalamo maalkoodana la dhaco, illaa Makka la furto ama heshiis la wada galo.
2. Haddii Yuhuuddu ay muujiso khiyaamo ama taageero ay siinayaan Quraysh iyo kuwa la mid ah in lala dagaalo, waddankana laga masaafuriyo.
3. Haddii qabiilo ku soo duusho Muslimiinta ay soo raacaan reer Quraysheed, waa lala dagaalamayaa illaa ay Islaamka qaataan.

4. Kiristaanka iyo Yuhuuddaba mid kii u muujiya cadaawad Muslimmiinta in lala dagaalamo ama ay bixiyaan madax-furad.
5. Qofkii muslim ah waa la badbaadinayaa naftiisa, iyo maalkiisa illaa uu isagu dembi galo mooyee.


Dagaalka Muslimmiinta iyo Qurayshi wuxuu ku bilaabmay Qarsoodi (Sirriyo). Sahankii ugu horeeyey ee uu Rasuulku diro, waxa madax ka ahaa Xamsa Ibna Cabdulmudalib (Nabi Maxamed N.N.K.H adeerkiis) Ilaahay raali haka ahaadee iyo 30 asxaabi oo kale, waxaana calanka u siday Abuu Murfid, waxaana ujeedada sahankoodu ahaa inay waddada isu taagaan safar reer Quraysheed ah, kana soo noqonayey Shaam oo uu hoggaaminayey Abu-sufyaan oo hoggaaminaya ilaa 300 oo Awt.

Markii ay iska hor yimaadeen labadii ciidan, waxaa dhex dhexaadiyey oo la kulmay ninka magaciisu yahay Majdiyi ibnu Caamir, labadii qolona way oggolaadeen taladii uu u soo bandhigay, sidaas bayna asxaabtu ku soo laabteen iyagoo nabad ah, Rasuulkuna wuu u mahadnaqay dhex-dhexaadiyahaas.

LAYLI:

CASHARKA TOBNAAD

1. Sheeg shuruudaha gaalada la iskaga difaacayo?
2. Sidee ayuu u bilaabmay dagaalkii muslimmiinta iyo qurayshtii?
3. Ayaa hoggaaminayay sahkankii ugu horeeyay ee rasuulku diro?
4. Muxuu ahaa ujeedada sahkankoodu?
5. Ayaa dhex dhexaadiyay labadii ciidan ee iska hor yimiday?




بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِنِّي أَسْتَغْفِرُكَ وَأَسْتَغْفِرُكَ لَكَ بِمَا كُنْتُ أَتِي بِمَوْلَاكُمْ بِأَلْفِ

مِنَ الْمَلَائِكَةِ كَمَا رَدِّفَتْ مَعِدَةَ الْأَنْفَالِ

CASHARKA TOBNAAD

BEDAR



بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِذْ تَسْتَغِيثُونَ رَبَّكُمْ فَاسْتَجَابَ لَكُمْ أَنِّي مُمِدُّكُمْ بِالْفِ

مِّنَ الْمَلَائِكَةِ مُرَدِّفِينَ

سورة الأنفال ٩

Dawladdii Islaamku markii ay dhisantay, ka dib ayaa waxaa bilaabmay dagaallo dhexmara gaalada iyo Muslimiinta. Goobtii ugu horreysey oo labada dhinac ay ku dagallameen waxay ahayd "BADAR".

Dadka Muslimka ah waxaa abbanduule u ahaa Nebigeenni suubanaa, waxaana weheliyey dad tiradooda lagu qiyaasay (313). Waxaase jirey in Gaaladu ay ka badnaayeen 1000 qof oo ay wadatey madaxdii qureyshta oo ay ka mid ahaayeen Abu Lahab iyo Abu Jahal, labaduba waxay ahaayeen Nebiga adeeradiis oo uu la jiro abbaanduulahoodii caanka ahaa "Abu Sufyaan".

Gaalada dad tiro badan ayaa laga diley, goobtiina waxaa ku guulaystey muslimiintii iyaga oo u kaalmo siiyay Ilaahay (SWT).


Gaaladii waxay noqdeen wax la diley, wax la qafaashay iyo wax cararay. Goobtaas dadkii Muslimka ahaa waxay ka heleen, sharaf, magac iyo geesinimo, libintoodiina waxa laga maqlay meel walba.

LAYLI:

1. Maxaa lagu magacaabaa goobtii uu ka dhacay dagaalkii ugu horreyey ee Muslimka iyo Gaalada dhexmara?
2. Muslimka intee buu ahaa, gaaladuse inte bay ahayd?
3. Yaa ku guulaystay dagaalkaas?
4. Yaa hoggaaminayey ciidanka muslimiinta ah?

CASHARKA KOW IYO TOBNAAD

FURASHADII MAKKA



Dagaalkii Bedar ka dib, dadkii Carabta ee deggenaa inta u dhaxaysa Madiina iyo Makka, qaar way muslimeen, qaarna raalli bay ku noqon waayeen guuldaradaas, oo waxay bilaabeen dagaallo ay la dagaallamayaan Muslimiinta. Dagaalladaas waxaa ka mid ahaa dagaalkii "UXUD".

Uxud marna muslinka ayaa adkaaday markii dambase muslinka waa la waabiyey. Nebigu markii uu arkay inay gaaladii ay ballankii ka baxday, ayuu cidan weyn oo tiradiisu gaareyso toban kun, isku habeeyey, qalab ku filanna siiyey. Nebigu isagoo hor kacaya ciidankii, ayuu ku soo duuley Makka. Markay Qureyshtii ogaatey in Nebiga iyo colkiisu ay dagaal ugu soo baxeen, bay argagaxeen oo ay isdhiibeen.

Sidaas daraaddeed Makka dhexdeeda dagaal kama dhicin. Nebigu markii uu Makka qabtay, wuxuu bilaabay inuu burbursho sanamyadii tirada badnaa e Kacbada dhex yiilay. Reer Makkana wuxuu u oggolaaday inay ku biiraan diinta Islaamka si dhiigooda iyo maalkooduba ugu nabad galaan.

Dadkii carabta ahaa ee ku noolaa jasiirada carbeed mid mid bay u soo galeen Islaamka. Sidaas baa diintii Islaamku ku guuleysatey, Carabtiina isu raacday, dulligii iyo xumaantii ay horay ugu jireenna Ilaah uga saaray. Nebigu wuxuu dhintay 12 bishili Mowlid, sanada Hijriyadu markay ahayd 11 (634 dh. c.), waxaana lagu aasay Madina.

LAYLI

1. Maxay ku kala duwanaayeen dagaalkii Uxud iyo furashadii Makka?
2. Maxaa Nebigu Makka ugu duulay?
3. Goormuu geeriyooday Nebigu?
4. Xaggee lagu aasay Nebiga?
5. Tirada muslimiinta ee dagaalkaas ka qayb gashey, waa imisa?

CASHARKA LABA IYO TOBNAAD

DHAQANKA FIICAN

Nimcada Ilaahay na siiyay mid la tirin karo ama la koobi karo maaha. Waxaa ka mid ah roobka, xoolaha, hawada iyo caafimaadka oo wax la siisan karaa uusan jirin. Waxaa kale oo ka mid ah dhaqanka fiican khaas ahaan carrabka lagu hadlo oo edebta hadalka saldhig u ah. Markii qofku hadlayo, waxaa fiican inuu hadalkiisa edeb u yeelo. Sida hadalka edeb loogu yeelaana way badan tahay.

Qofku markuu hadlayo, waa inuusan cod dheer ku hadlin, illeen qof kasta ma dhaga la'a. Dheguhu aad ayay u neceb yihiin hadalka dhaadheer ama buuqa.

Qofka kaa weyn, waa inaadan cod dheer kula hadlin, waayo maamuus iyo xushmad ayuu kaa mudan yahay. Tan kale haddii aad qof u yeerayso, wanaaggu wuxuu ku jiraa inaad magaciisa ugu yeerto. waxaa lagaaga digayaa inaadan dadka ugu yeerin naaneys uu dhibsan karo ama dheel dheel ku jiro.

Dhaqanka fiican, waxaa ugu muhiimsan in aad qof kasta aad ula dhaqantid, sida aad adiguba jeceshahay in laguula dhaqmo.

Dadka shisheeyaha ah waa inaad dhaqankaaga wanaagsan wax ka bartaa, adigoo kula dhaqmaya qaabka ugu wanaagsan. Ha dhibsan hana la yaabin dhaqankiisa, waayo qof kasta iyo dal kastaaba dhaqan u gooni ah ayey leeyihiin. Waxaadse ku dadaashaa in dhaqankaagu aanu kaa lumin adigoo u hanqal taagaya ka shisheeye.

Sidaas oo kale ayaa wanaaggu ku jiraa inaad dadka kalena kula socotid adigoo ku dhaggan dhaqankaaga wanaagsan. Edebta iyo xishoodka diinteenu ina faraysana waa in aan u hoggaasananaa. Ogow edebtu hadalka waa ay qurxisaa sida dharku jidhka dadka uu u qurxiyo.

LAYLI:

1. Nicmada Ilaahay ina siiyay maxaa ka mid ah?
2. Maxaa ugu muhiimsan dhaqanka fiican?
3. Sidee ugu wanaagsan ee loola dhaqmaa dadka shisheeyaha ah?
4. Sidee wanaagu ku jiraa inaad dadka ula dhaqantid?

CASHARKA SADEX IYO TOBNAAD

RASUULKA (scw) DABEECADIISII

Rasuulka scw dabeecadiisu aad ayey u wanaagsanayd dhinaca walba, Alle ayaana meel badan oo Qur'aanka ka mid ah ku tilmaamay, waxaana ka mid ah ayaadan ku taalla surat al Qalam.

(waxaad ku sugan tahay "Akhlaaq wayn") Suurtal Al-Qalam 4.

Sidoo kale Caa'isha markii la weydiiyey akhlaaqda Nabi Maxamed scw, waxa ay tiri: "dabeecadiisu waxa ay ahayd Qur'aanka". Rasuulka scw dabeecadiisii iyo akhlaaqdiisii wanaagsanayd waxaa noogu filan Siiradiisa, aad ayuuna ugu wanaagsanaa dhinac walba hadday noqoto tawaaduciisii, xishoodkiisii, runtiisii, ammaanadiisii, caqligiisii, geesinimadiisii, hoggaankiisii, u jilicsanaantiisii dadka muslimiinta ah iyo ku ad adkaantiisii caniidiintii madaxa adkaa ee xaqa ka hor yimid.

Wuxuu ahaa Nabi Maxamed (NNKH) nin Alle ka doortay bani aadamka oo dhan, oo uu ka daahiray nuqsaan kuligeed.

LAYLI

1. Tilmaam sifadii akhlaaqda iyo dabeecadii Rasuulka scw?
2. Sheeg aayadii sura Al-Qalam ku jirtey ee Alle ku sifeeyey?